Alberta

War faafin

# Warbixinta Rubuca 1aad ee Sannadka: Kobaca dhaqaale ee joogtada ah

Agoosto 31, 2023 Su'aalaha Warbaahinta

## Maamulka xoogan ee dhaqaalaha Alberta ayaa sii wada inuu adkeeyo mustaqbalka Alberta.

Alberta waxay qarka u saaran tahay inay soo xareyso dakhli dheeri ah oo dhan $2.4-bilyan dhammaadka sanad miisaaniyadeedka 2023-24, ayadoo lagu gudo jiro xilli aan hore loo filanayn oo kaymo gubteen daganaansho dhanka dhaqaalaha ahina uu sii socdo. Tani waxay $94 milyan ka badan tahay miisaaniyadii loo saadaalinayay 2023.

Maamul maaliyadeed oo xooggan ayaa ka caawin doona Alberta inay noqoto goobta dhaqaalaha ee Canada. Qaab xisaabeedka cusub ee dawlada ayaa ka doonaysa dawlada inay adeegsato ugu yaraan badh kamid ah dakhliga dheeraadka ah si ay ugu bixiso daynta, sii daynta lacagta lagu taageeri karo baahiyaha qoysaska Alberta hadda iyo tobonaanka sano ee soo socda. Ayadoo lagu salaynayo warbixinta rubuca koobaad ee sannadka, Alberta ayaa qorsheynaysa inay iska bixiso $2.6 bilyan oo ah daynta laga bixiyo cashuurta sannadkan.

"Dhaqaalaha Alberta ayaa ah mid xooggan, iyada oo uu mahada iska leeyahay qaab xisaabeedkan cusub, heerka dhaqaalaha Alberta ayaa la filayaa inuu noqdo mid intaan kasii xooggan. Ahmiyada aynu sii siinayono bixinta daynta iyo ukaydsashada lacag mustaqbalka ayaa xaqiijinaysa inaan yeelano awood aan ku buuxino baahiyaha dadka reer Alberta maanta iyo mustaqbalka fogba."

*Travis Toews, Gudoomiyaha Guddiga Khasnada iyo Wasiirka Maaliyadda*

Kadib marka cadadka loo baahan yahay ee 50 boqolkiiba lacagta la qorsheeyay ee dakhliga dheeriga ah loo isticmaalo bixinta daynta dawlada lagu leeyahay, lacagta soo harta ee dheeriga ku ah miisaaniyada ayaa lagu shubi doonaa Sanduuqa Alberta, iyadoo

loo adeegsan karo dib u bixinta daymaha dheeriga ah, ku daridda lacag Sanduuqa Kaydka Hidaha Alberta iyo mashaariicda halka mar la fuliyo ee aan keenayn kororka joogtada ah ee qarashaadka dawlada. Dakhliga la filaayo ee $2.6 bilyan ah ayaa loo qoondeyn doonaa sanduuqa Alberta 2023-24.

## Dakhliga

Dakhliga soo xaroon doona 2023-24 waxaa lagu saadaalinayaa $71.1 bilyan, kanoo ka badan lacag dhan $491-milyan Miisaaniyadii 2023.

Ganacsiga fiican ee Alberta ayaa soo jiidaneya maalgashiga iyo dadka daafaha wadanka ka yimaada, taasoo abuurtay $dakhliga kasoo xarooda canshuurta dakhliga ee shirkadaha iyo kuwa shaqsiyaadka uu kordho $1.5 bilyan.

Saadaasha dakhliga kasoo xarooda canshuurta dakhliga shirkadaha ayaa kordhay $889 milyan, kadib markii dakhligii abid ugu badnaa kasoo xarooday sanad miisaaniyadeedkii 2022-23. Sideed boqolkiiba, heerka canshuurta dakhliga shirkadaha ayaa guud ahaan ah tan ugu yar wadanka. Canshuuraha hooseeya ee Alberta ayaa ah halka sabab ee maalgashadeyaashu u doortaan Alberta.

In noloshu ahaato mid qiimo jaban ayaa ah muhiimada koobaad ee dawlada Alberta, taasoo ah sababta ay u joojisay canshuurta shidaalka ee gobalka ee laga qaadi jiray gaaska iyo naaftada bishii Janaayo. Sii wadida hakintaas ilaa dhammaadka sanadka 2023 ayaa ka badbaadinayas dadka Alberta iyo ganacsiyada Alberta 13 senti oo laga qaadi jiray litirkiiba gaas iyo naafto ah inta ka hartay sanadka. Taas awgeed, dakhliga canshuuraha shidaalka ayaa la filayaa inuu hoos u dhaco $532 milyan - lacagta ayaa dib ugu laabanaysa jeebabka dadka Alberta markasta oo ay gaarigooda shidaal ku shubtaan.

Inta u dhexaysa Abriil 1 iyo Juun 30, qiimaha shidaalka West Texas Intermediate (WTI) ayaa celcelis ahaan ahaa US$74 halkii fuusto. Hadda waxaa lagu qiyaasayaa celcelis ahaan qiimo dhan $US75 fuustadiiba inta lagu jiro sanad miisaaniyadeedka, $4 kayar saadaasha Miisaaniyada 2023. Saamaynta ay ku yeelanayso dakhliga Alberta ayaa ah oo ay daboolayso hoos u dhaca farqiga qiimaha shidaalka culus (light-heavy oil), kaasoo hadda la saadaalinayo inuu yahay US$15 fuustadiiba, $5 ka yar inta miisaaniyada.

Lacagaha gunnada kasoo xaroota Bitumen ayaa la saadaalinayaa inay kordhaan $515 milyan sannadka 2023-24; hase yeeshee, dakhliga guud ee soo xarooda ayaa la saadaalinayaa inuu kordho $694 milyan in ka badan miisaaniyadii la saadaalinayay.

Lacagaha la dulsaaro gaaska dabiiciga ah ee hooseeya ayaa abuuray hoos u dhaca ugu badan ee la saadaalinaayay tanoo ay sabab u ahayd qiimeyaasha hooseeya, wax soo saarka badan ee Waqooyiga Ameerika iyo saamaynta uu dabka kaymuhu ku yeeshay wax soo saarka Alberta.

## Qarashka

Lacagta la qarash garayn doono sannadka 2023-24 waxaa la saadaalinayaa inuu dhan yahay $68.7 bilyan, tanoo ka badan $397 milyan Miisaaniyada sannadka 2023. Kororka qarashka ka hor lacagta loo qorsheeyay saadaalinta ayaa ah $1.6 bilyan. Lacagtan, $397 milyan ayaa lagu maalgashay dakhliga go'an, $1.2 bilyan ayaa loo qoondeeyay wixii dhacdooyin la ma filaan ah, taasoo soo reebaya $323 milyan oo aan la qoondeyn.

Xilligan kaymuhu gubanayaan ee aan la filanayn ee ka dhacday gobalka ayaa keentay in dawlada Alberta ay talaabo degdeg ah qaado si loo xaqiijiyo badqabka dadka Alberta ee meelaha uu saameeyay. Ilaa hadda, dawlada ayaa u qoondeysay $750 milyan oo lagula dagaalamaayo dabka kaymaha ee gobalka sanadkan, oo ay la socdaan $175 milyan oo loogu talo galay waxyeelooyinka aan caymiska lahayn, $75 milyan oo ka mid ah oo la filaayo inay daboolayso dawlada federaalku, iyo $55 milyan, oo guud ahaan loogu talo galay qarashaadka daadguraynta degdega ah. Dawlada Alberta ayaa sii wadaysa inay taageerto dadka reer Alberta inta lagu jiro xaaladaha adag sida masiibooyinka dabiiciga ah.

Saadaasha qarashka lagu hawlgalayo ayaa korodhay $179 milyan, tanoo ay guud ahaan sabab utahay $214 milyan ee ah korodhka ku yimid maalgelinta Caafimaadka kaasoo si buuxda u daboolaya dakhliga heshiiska dakhliga ee labada dhinacoodka ah ee federaalka. Deeqda lacagta ee korortay $170 milyan ayaa inta badan loogu talo galay dib u habaynta mashaariicdii sanadkii miisaaniyadeedka 2022-23.

Qarashaadka loogu adeegayo daynta ayaa la saadaalinayaa inay kordhaan $245 milyan oo kamid ah miisaaniyada, oo ay sababtay qiimeyaasha sareeya ee dulsaarta - taasoo sii adkaynaysa dadaalka ay dawladu ugu jirto bixinta daynta.

## Sanduuqa Kaydadka Hidaha Alberta (Alberta Heritage Savings Trust Fund)

Sanduuqa Kaydadka Hidaha Alberta waa akoonka kaydadka mudada fog ee Alberta, dawlada ayaana wali doonaysa inay kor u qaado. Sanduuqa ayaa dhaqaale badan lagu shubay rubuca koobaad ee sanad miisaaniyadeedka 2023-24, ayadoo lagu shubay labo

boqolkiiba dakhliga xaasilka ah ee maalgelinta kaasoo ah $739 milyan. Qiimaha guud ee lacagta ku jirtay Juun 30 ayaa ahayd $21.6 bilyan, taasoo kasoo kacday $21.2 bilyan oo ay ahayd dhammaadka sanad miisaaniyadeedkii hore.

Muddo shan sano ah, sanduuqa ayaa soo celiyay 6.4 boqolkiiba, taasoo ah 0.6 boqolkiiba in ka badan dakhligii la qiyaasaayay.

## Guudmarka dhaqaalaha

Ayadoo sii wada kobcinta iyo balaarinta dhaqaalaha Alberta, dawlada Alberta ayaa sii wada inay heer ka sarreeya gaadho himilooyinkii laga filayay. Heerka dhaqaalaha guud ee Alberta ayaa hadda la filayaa inuu kor u kaco sadex boqolkiiba sanadka 2023, kaasoo dhan 0.2 boqolkiiba Miisaaniyada 2023. Saadaalinaha ay bixiyeen saadaaliyayaasha madaxa banaan ayaa muujinaya in la filaayo in gobalku uu wadanka ku hogaamin doono kobaca dhaqaalaha sanadkaan.

Kobaca wayn ee bulshada waxaa ayaa taageeraysaa suuqa shaqaalaha Alberta wuxuuna abuurayaa dalabka iyo shaqo dheeri ah oo dhaqaalaha Alberta ah, kaasoo ugu danbayn kor uqaadaya kobaca dhaqaalaha gobolka. Inkastoo ay jiraan khattaro mustaqbalkuna aanu ahayn mid lahubo sababo la xiriira qiimaha dulsaarta oo sii kordhaya, qiimaha waxyaabaha la iibsado oo korreeya iyo sababo kale, dhaqaalaha Alberta ayaa ah mid xooggan oo ka gudbi kara caqabado kasta oo yimaada.

## Xaqiiqooyinka kooban

- Cadadka lacagta dheeriga ah ee lagu bixin karo daynta iyo Sanduuqa Alberta ayaa la xisaabiyaa kadib marka kaashka dib uhabayn lagu sameeyo.
    - Sanadka 2023-24, cadadka guud ee lacagta la doonayo in la qoondeeyo ayaa la saadaalinayaa inay noqoto $5.2 bilyan, taasoo ay ka mid tahay $5.1 bilyan oo lagasoo qaatay natiijooyinka miisaaniyada kama danbaysta ah ee 2022-23.

## Macluumaadka la xiriira

- Warbixinta Rubuca Koobaad ee Sanad miisanaiyadeedka 2023-24 iyo Bayaanka Dhaqaalaha

## Warbaahinta kala duwan

- Daawo war saxaafadeedka

## Su’aalaha warbaahinta

### Savannah Johannsen

780-686-3521
Xoghayaha Warfaafinta, Guddiga Khasnada iyo Maaliyadda